

Xeerka Madaxweynaha ee Golaha Sare ee Kacaanka L. 6 ee 30 Oktoober 1969
Oggolanshaha Xeer nidaamiyaha Habka Fulinta xukunnada dilka

**MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Kadib markii la arkay Axdigaa 1aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

Kadib markii la arkay Dasturka Jamhuuriyadda Somaliya qeybteeda waafaqsan xeerkaan;

Kadib markii la arkay qod. 47 ee Sharciga lamba. 1 ee 31 Maarsa 1964 ee Habka Xeerka Ciqaabka Militariga xilliga Nabadda iyo Dagaalka;

Kadib markii la arkay qod. 1 ee Sharciga lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

Kadib markii la garoowsada baahidda loo qabo soo saarida xeerarka habka; fulinta xukumadda dilka oo ay soo saarto Maxkamadda Militariga ee Dowladda.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Waxaa la aqbalay “Xeer nidaamiyaha habka fulinta xukumadda dilka oo ay soo saartay Maxkamadda Militariga ee Dowladda.

Qod. 2

Waxaa la buriyey xeer kasta iyo amaradda xeeriya habka fulinta xukumadda dilka oo ka hor imaanaya sharciga.

Qod. 3

Xeerkaan wuxuu hirgeli doonata 15 beri kadib markii lagu soo faafiyoo Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 30 Oktoobar 1969.

Maxaxweynaha

Golaha Sare ee Kacaanka

Sareeye Guuto Mohamed Siyad Barre

XEERKA MILITARIGA EE FULINTA XUKUNKA DILKA

Qod. 1 Fulinta Xukunka Dilka

Kadib markii xukunka dilka uu noqdo mid ka noqosho lahayn Xeer Ilalaaliyahay Guud ee Militariga wuxuu wargelinaya si degdeg ah Maxkamadda Sare ee Militariga iyo Wasiirka Difaaca.

Qod. 2 Habka Qaadista

Maxkamadda Sare ee Militariga kadib markii la helo fulinta oo ay xukunka dilka noqota mid aan ka noqosho lahayn oo loo gudbiyo Xeer Ilalaaliyahay Guud ee Militariga si loo fuliyo xukunka. Xeer Ilalaaliyahay Guud Militariga kadib markii uu helay xukunkadilka, waxaana laga rabaa in uu cayimo taarikhda iyo goobta fulinta xukunka dilka.

Qod. 3 Fulinta Xukunka Dilka

Fulinta xukunka dilka waa mid ku timaada xabbad oo ay fuliyaan askarta ka tirsan Xoogga Dalka, Ciidanka Booliska iyo kuwa Asluubta mar marka qaarkooda madaxda Xeer Ilalinta Guud ee Militariga.

Fulinta waxaa kale oo ka soo qeyb geli doonta Xafiiska Xeer Ilalaaliyahay, xoghayanta iyo takhtarka loogu tala galay, qof wadaad ah ee haysta diinta qofka xukunka dilka lagu fulin doono.

Qod. 4 Bayaanka in Qofkii la dilay iyo Hubinta Takhtarka in Qofku Dhintay

Bayaan ayaa laga soo saari doon xukunka in la fuliyey iyo in la hubiyey si takhtarnimo in qofkii la dilay uu g eeriyoday, waxaa lagu qori doona warbixin ee Xafiiska Xeer Ilalaaliyahay Guud ee Militariga.

Qod. 5 Hakinta fulinta xukunka dilka iyo codsiga cafiska

Xulinta xukunka dilka waxaa la hakin karaa:

1. Haddii la soo gudbiyey codsi cafis ilaa intii laga helayo;
2. Haddii Wasiirka Difaaca iyo Taliyaha Guud ee ciidanka oo uu ka tirsan yahay in loo bedello ama la cafiyo xukunka dilka iyado codsigaas loo diri doono Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Qod. 6 Dhismaha Unuga Fulinaaya Xukunka Dilka

Unuga loo tala galay in ay fuliyaan xukunka dilka waxay ka kooban yahay 3 qeybood oo hubkooda sidata, iyo xabbadahooda sitana dharkooda gaarka ah, waxaa madax u ah Sarkaal oo amar ka haysta Xeer Ilalaaliyahay Guud ee Militariga ee Qeybta Xogga Dalka, Ciidanka Booliska iyo midka Asluubta oo ku suggan goobta xukunka laga fulin doono.

Qod. 7
Qaabka Fulinta Xukunka Dilka

Taliyaha unuga fulin doono xukunka dilka wuxuu bixin doonaa amarradda sida:

Diyaargarooba, shiishka saaraa, toogta. Amarraddana waxaa lagu celceli doona ilaa iyo intii laga gaari doono geerida qofka la xukmiyey oo uu takhtarku hubsaday in uu dhintay.

Qod. 8
Amaarada Taliyaha Unuga

Kadib markii fulinta xukunka dilku dhammado, Taliyaha unugu oo uu ka tirsana qofka la dilay ama hadii uu maqan yahay, cidda militariga oo ugu darajo sareysa eek u suggan goobta fulintu ka dhacay waxaa oo u xilsaaran yahay in uu abaabulo qaabkii loo duugi lahaa.

Kharajka duugta waxaa iska leh Dowladda.